

Talooyinka xiliga COVID-19:

Dugsiyo Amaan ah Talada waalidka



Coronavirus
COVID-19
Public Health
Advice

Dugsiyada Bulshadu waxay u shaqaynayaan si adag sidii loo hubin lahaa howlaha iskuulka ee ardaha, shaqaalaha iyo qoysaska.

Dhammaan dugsiyadu waxay dejiyeen xeerar iyo waxqabadyo ay tahay in la raaco si loo ilaaliyo nabadgelyada iyo caafimaad qabka qof walba.

Taladii ugu dambaysa ee arimaha caafimaadka bulshada ee ku soo laabashada dugsiya ayaa laga heli karaa hlakn.gov.ie/schools.



Haddii ilmahaagu qabo mid ka mid ah astaamaha soo socda ee 'Covid-19', ha u dirin dugsiya oo ha la xiriir dhakhtarkaag gaark ah:

- Heerkul ka badan 38 Digrii ama ka badan.
- Calaamadaha kale ee caanka ah ee Covid-19 – sida qufac cusub, lumis ama dareen dhadhanka iyo urta oo is bedela, neefta oo ku qabata ama xaalad neefsasho jirta oo ka sii dartay
- Haddii uu xidhiidh dhow la lahaa qof laga helay cudurka 'Covid-19'
- Haddii uu la noolaa qof aan caafimaad qabin oo laga yaabo inuu qabo xanuunka Covid-19
- Calaamadaha kale ee aan caadiga ahayn ee Covid-19, sida cunaha oo xanuuna, madax xanuun ama shuban
- Laga soo celiyey wadan kale 14kii maalmood ee la soo dhaafay.



halkan ka eeg xog dheeraad ah.

Wada xidhiidh/taabasho dhow: haddii arday ama xubin ka mid ah shaqaalaha iskuulka laga helo xanuunka 'Covid-19', waxaa looga baahan yahay inay iskarantiilaan, kadibna qiimeynta halista caafimaadka bulshada la sameeyo. Arday kasta ama xubin shaqaale ah oo loo arko inuu xiriir dhow la leeyahay qofkas waxaa looga baahan yahay inuu xaddido dhaqdhaqaaqiisa oo uusan tegin dugsiya.

Tusaale: Xiriirka dhow waa inuu xaddidaa dhaqdhaqaaqa

- Conor O'Kane of Scoil Mhuire waxa uu dhigtaa fasalka 2aad
- Ilmo ku jiray taandhadiisa yar ayaa laga helay xanuunka Covid-19
- Kadib qiimeynta halista caafimaadka bulshada, Conor waxaa loo aqoonsaday inuu yahay qof ugu dhawaa ilmahaas laga helay
- Conor waalidiintiisa waxaa lagu wargeliyay inuu xaddido dhaqdhaqaaqiisa ilaa 14 maalmood tan iyo maalintii ugu dambaysay ee uu la xiriiray cunugga laga helay xanuunkay



Tusaale: Contact of a contact is not required to restrict movements

- Tara O'Kane of Scoil Mhuire waxay dhigataa falka 5aad. Waa Conor walaashiis.
- Waaxda Caafimaadka Dadweynaha iyada umay aqoonsan inay xiriir dhow la leedahay cunugga laga helay cudurka.
- Tara way sii wadan kartaa inay dhigato iskuulka
- Haddii Conor ama qof kale oo qoyska ka mid ah laga helo xanuunka, markaas Tara waa inay guriga joogtaa.



An Roinn Oideachais
Department of Education

Talooyinka xiliga COVID-19:

Dugsiyo Amaan ah Talada waalidka



Coronavirus
COVID-19
Public Health
Advice



- **Fasallada asaasiga ah ee dugsiya sare iyo nidaamka fageynta jirka waan in la raaco dhammaantood.**



- Waa shuruud in wejiga la daboolo ay xirtaan maskaro macalimiinta, shaqaalaha iskuulada iyo ardayda dhigata dugsiya ka danbeeya dugsiya hoose dhexe.
- Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu lugeeyo ama baaskiil ku raaco dugsiya haddii ay suurogal tahay oo ammaan u tahay inuu sidaas sameeyo.



- Soo qaad iyo soo degitaanku waxay noqon karaan waqti mashquul badan.



- **Dhaqidda gacmaha iyo nadaafadda wanaagsan** - waxay muhiim u tahay dhammaan ardayda. Hubso in ilmahaagu yaqaano inuu isticmaalo istaraasho si uu ugu daboolo afkiisa marka qufacayo ama hindhisayo ama ku qufaco ama ku hindhiso xusulkiisa.



- **Dugsiya hoose** - caruurta yar yar looma baahna inay ku dhaqmaan kal fageynta jirka, laakiin waxaa loo abaabulay qeybaha fasalka dhexdiisa inay kala durkaan.



- **Gaadiidka dugsiya** - ardaydu waxay heli doonaan kursi loo qoondeeyay oo ay tahay inay fadhiistaan ardayda dugsiya hoose waxaa looga baahan doonaa inay xirtaan maaskarada wajiga marka ay sugayaan iyo markay baska fuulayaan.

- Fadlan hubi kala fogaanshaha bulshada adoo raacaya hagidda dugsiya goorta iyo meesha la tagayo. Fadlan ka soo qaad ilmahaaga iskuulka si deg deg ah adigoo ka daahin.
- Waalidiintu waa inay raacaan talooyinka caafimaadka bulshada ee ku saabsan la dhaqanka bulshada ee ka baxsan guriga si carruurtooda loo ilaaliyo xiliga dugsiya.